



**WAXAA LOOGU TALAGALAY
SIIDAYNTA DEGDEGGA AH**

Lambarka Idaacadda:

Renee Murphy
502.338.5377 (unug)
Mark Hebert
502.322.4565 (unug)

JCPS waxay ku boorineysaa qoysaska inay cusboonaysiiyaan macluumaadka lambarada

E-mayl casri ah iyo lambarrada taleefannada waxay xaqiijiyaan qoysaska in ay helaan macluumaad muhiim ah

Luulyo 29, 2020 – Iskuulada Dadweynaha ee Jefferson (JCPS) waxay ku boorinayaan qoysaska inay hubiyaan in macluumaadka lambaradooda ay yihiin kuwa casri ah, iyo inay u diiwaangashan yihiin helitaanka farriimaha qoraalka ee JCPS maaddaama degmadu ay isu diyaarineyso bilowga Waxbarista Waxbarasha aan ahayn Mid dhaqameed (NTI).

Cinwaanada e-maylka ee ugu dambeeyay iyo lambarrada taleefannadu ayaa muhiim u noqon doonaan qoysaska u baahan inay codsadaan laabtooda Chromebook iyo / ama qalabka hotspot sannad dugsiyeedka soo socda. Wada xiriirka ka socda iskuulada ardayda iyo macalimiinta ayaa waliba u baahan emayl sax ah ama lambar taleefan.

Iyada oo isbeddelada shaqada iyo xaaladaha kasoo shaqi tagitaanka guriga la tixgilinayo, cinwaanada emaylka hore ayaa laga yaabaa inaysan sii shaqeynin. Qoysaska hada helaya emaylada degmada iyo iskuulka iyo fariimaha qoraalka ah, tallaabo uma baahna waqtigan.

Si loo xaqiijiyo in waalidiinta iyo wakiilada ay macluumaad ka helaan JCPS, waxaa lagu dhiirigeliyay inay qaadaan tillaabooyinka soo socda:

Si aad u hubiso inaad heshid farriimaha qoraalka ah, si fudud uga xulo Fariin Gudbiyaha Iskuulka adigoo u diraya Y lambarkan 67587. **WAA INAAD DOORATO** nidaamkan si aad u hesho farriimaha qoraalka. Xitaa haddii JCPS ay ku haysato lambarka taleefankaaga saxda ah faylka, ma heleysid farriimaha qoraalka ah haddii aadan dooranin Fariin Gudbiyaha Iskuulka.

Si aad uga hesho emayllada degmada iyo dugsiga carruurtaada, waa inuu cinwaanka e-maylkaaga hadda ku jiraa nidaamkayaga JCPS. Macluumaadka waa lagu cusboonaysiin karaa [Bogg Waalidka](#). Haddii aadan lahayn galitaanka Xariirka Waalidka, waad ku sameysan kartaa koonto [halkan](#).

Hadaad leedahay koonto hada jirta, u gudub bogga Waalidka oo dhagsii "Gal bogga Waalidka".

1. Xullo Wareegtada Waalid
2. Gali diiwaanka aqoonsiga (magaca isticmaale iyo lambarka sirta ah)
 - a. Dhagsii wixii Dheeraad ah
 - b. Guji Macluumaadka Qoyska
 - c. Guji Cusbooneysiinta (sax macluumaadkaaga ka dibna dhagsii cusbooneysiinta mar labaad)

Qoysaska horey uga diiwaangaliyay emayllada JCPS, ama ku soo wargaliyay emayllada inay yihiin spam, ma heli doonaan emayllada mustaqbalka.

Maalinta ugu horeysa ee JCPS waxaa loo qorsheeyay Ogosto 25-keeda.

*Kala soco [JCPS](#) khadka tooska ah ee [Facebook](#), [Twitter](#), [Instagram](#) iyo [YouTube](#).
JCPS ###*